Qormada 3aad, Oktoobar 2011

# UNPOS Quarterly

*Horumarinta Nabadda iyo Dibuheshiisiiinta Soomaaliya*




## Qorshehawleedka oo la ansaxiyay

Kulanka Wadatashiga ee Dhammeynta Ku Meelgaarka

## Golaha Wasiirada cusub ee Soomaaliya oo lagu dhawaaqay

## Shirkadaha Taleefanda Somaliland

# Farriin ka socota Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay

Ku soo dhowaada Nuqulka Saddexaad ee Wargeyska Saddex biloodlaha ah ee UNPOS. Wuxuuna hadda ku soo beegmay waqti ay dhacayaan arrimo muhiim ah. Haddii aan dhacdooyinka ka eegno dhanka wanaagga, waxaan aragnay dhowrkii bilood ee la soo dhaafay in ururka Al-Shabaab ee xagjirka ah ay dib uga guuray magaalada Muqdisho inteeda badan iyo ansaxiintii Qorshe Hawleedka Xukuumadda, kaasoo lagu ansaxiyay shir muhiim ah oo ka dhacay Mugdisho. Waxaan fileynaa in Qorshe Hawleedkani uu u xaqiijin doono madaxda Soomaalida inay dhammeystiraan hawlahooda. Hase ahaatee, nasiib darro, abaarta masiibada ah iyo macluusha dalka ka jirta ayaa culeys aad u weyn ku haya hay'adaha samafalka.

Waqtiga hadda la joogo, boqolaal kun oo Soomaali ah ayaa dalka ku macluulsan. Waxayna qarka u saaran yihiin dhimasho. Horaantii bishii Sebtember, Lix degmo oo dalka ka mid ah ayaa lagu dhawaaqay inay ka jirto macluul. Qaramada Midoobayna Waxay sii waddaa dadaalkeeda ku aadan qaybinta gargaarka meel kasta oo suurtagal ah. Waxaa kale oo mudan inaan xuso tallaabada uu qaaday Ururka Midowga Afrika oo qabtay shir lagu ururinayo gargaar 25kii bishii Agoosto, 20011. Waxaana shirkaas lagu ballanqaaday gargaar gaaraya sedax boqol iyo kontan milyan oo doolar (USD 350 M). Welina waxaa loo baahan yahay kaalmo kale. Kaalmada dhaqaale degdeg ayaa loogu baahan yahay inkastoo dhaqaalaha keliya uusan xallin karin dhibaatada jirta. Waxaan ugu baaqaya kuwa hortaagan dadaalka kaalmada lagu gaarsiinayo goobaha ay macluushu ka jirto inay hubka dhigaan, qalbigoodana u furaan walaalahooda dhibaateysan, waana inay u ogolaadaan hay'adaha samafalka inay si xor ah oo madaxbanaan u gaaran dhulka dhibaatada ka jirto.

Waxaa kaloo loo baahan yahay in aan si wadajir ah u wada shaqeyno si aan u xallino dhibaatada bini'aadinimo ee hadda taagan iyo inaan xaqiijino in dhibaatadan ayna mar labaad soo noqonin. Sida uga fiican ee aan arrintaan ku sameyn karno waxay tahay in aan xaqiijino sidii nabad iyo xasillooni loogu soo celin lahaa Somaaliya isla markaana loo heli lahaa xasillooni iyo dowlad loo wada dhanyahay.

Waxaa la qaaday tallaabooyin muhiim ah sidii loo heli lahaa arrimaha aan kor ku soo sheegnay. Horaantii bishii Sebtember waxaa Muqdisho lagu qobtey shir wadatashi ah ee heer sare ah loogana arrinsanayay dhameynta xilliga kumeelgaarka. Amaan xumida dalka ka jirtay Awgeed, ma suurtowdeen in laga fikiro arrintan dhowr bilood ka hor. Hase ahaatee, boqol qof dad ka badan oo ka kala socda bulshada caalamka, xubno ka socda Dowladda Federaalka Kumeelgaarka, Baarlamaanka Federaalka Kumelgaarka, Maamullada Puntland, Galmudug iyo Ahlu Sunna WalJamaaca ayaa ka qeybgalay kulankaas oo xafladdii furitaankiisa lagu qabtay xarunta Baarlamaanka ee ku taalla magaalada gudaheeda.

Shirku wuxuu ansixiyey Qorshe Hawleed qeexaaya hawlaha muhiimka ah ee la doonayo in Dowlada Federalka Kumeelgaarka ku qabato laba iyo tobanka bilood ee soo socota, waxaana ka mid ah gabagabaynta iyo ansaxinta dastuurka qabyo qoraalka ah, Baarlamaanka oo isbedel lagu sameeyo, doorashana la qabto, in la hormariyo maamul wanaagga iyo habka ku dhisan isla xisaabtanka, in aad loo hormariyo amniga magaalada Muqdisho iyo Gobollada ee koonfurta Soomaaliya. Sidoo kale, waxaa la doonayaa in la hormariyo arrimaha dibuheshiisiinta iyo la xiriiridda (dhinacyada ay arintu khuseyso). Qorshe Hawleedku wuxuu leeyahay waqti gaar ah oo kooban iyo habab kala gedisan oo lagu kormeerayo hirgelintiisa, sida sameynta guddi siyaasadeed ee heer sare ah. Ansaxinta Qorshe Hawleedkan, marka ugu dambeysa, wuxuu dhammaanteena nagu hagayaa in aan horey ugu tallaabsano helitaaanka hanaan dastuuri ah oo loo wada dhan yahay iyo in hay'adaha sharcidejinta dib u habeyn weyn lagu sameeyo, arrimaha amniga xukuumaddana wax laga qabto. Waxaa kaloo muhiimad leh in ansaxinta Qorshe Hawleedka uu na tusayo in dadka Soomaaliyeed ay leeyihiin geedi socod nabadeed, ayna ku heshiiyeen hawlaha muhiimka ah ee horyaalla oo ay donayaan inay ku qabtaan muddo cayiman gudaheeda.

Mar hadii waddada siyaasadeed la qeexey laba iyo tobonka bilood ee soo socda, waxaan dhihi karnaa geedi socodka nabadda wuxuu galay weji cusub. Annaga haddaan nahay UNPOS, waxaan ku hawlanahay sidii aan ku ballaarin lahayn joogitaankeena Soomaaliya, oo aan shaqaale rayid ah ee ka socda Qaramada Midoobey ku geyn lahayn Muqdisho,



Garoowe iyo Hargeysa si aan si muuqata oo waxtar leh ula hawlgalno asxaabteena Soomaaliyeed. Waxaa jiri doona shirar kale oo wada tashi ah si markaasi kuwa doonaya inay hormariyaan nabadda iyo dibuheshiisiinta ay u helaan fursad ay uga soo qeybgalaan wadahadalka. Bulshada caalamka waxaa si aad ah uga go'an taagerida geedi socodka nabada iyagoo soo wada qorshe dhaqaale lagu ururinayo. Hase ahaatee, waxay dhinacyada oo dhan isla fahansan yihiin in taageerada iyo ka qeybgalkuba ay ku xiran yihiin meel marinta arrimaha ugu muhiimsan ee Qorshe Hawleedka. Horumarka laga sameeyay dhinaca amniga ayaa suurtageliyey hormarka siyaasadeed ee la sameeyay intiisa badan. Dowladda Federaalka Kumelgaarka oo taagera ka haysata saaxibadeeda iyo geesiyaasha nabad ilaalinta Uruka Midowga Afrika, ayaa u suurtageliyey inay la wareegto gacan ku haynta magaalada Muqdisho inteeda badan. Arrintani waxay suurtagelisay in waxyar oo xasillooni ah la helo inkastoo xagjireyaashu weli ay wadaan caqabado ama dhibaatooyin. Nabadgelyadan yarta ah waxay u suurtagelinaysaa dadka Soomaaliyed ee caadiga ah inay xoogaa si mabadgelyo ah ugu noolaadaan caasimada gudaheeda.

Dhammaanteena waxaa na horyaalla hawlo aad u farabadan, hase ahaatee, waxaa shaki la'aan ah in ayna jirin fursad tan hadda jirta ka fiican oo laga faa'ideysan lahaa. Waxaan aaminsanahay inay arrintani tahay fursad dhab ah oo horumar lagu sameyn karo haddii aan mideysnaano hawshana aan sii wadno. Waxaan rajeynayaa inaan Soomaaliya xasillooni ku soo celin karno, waxna u qaban karno boqolaalka kun ee Soomaalida ah ee hadda sida aadka ah u dhibaateysan, waxaana arki doonaa isbedel joogta ah oo aad loogu baahanyahay inuu ka dhaco Soomaaliya

**Dr. Augustine P. Mahiga**
**Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay**
**October 2011**

# Tusmada Qormadan




| | |
|---|---|
| Farriinta Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay | 2 |
| Wararka | 4 |
| Wadatashi looga hadlay soo gabagabeynta xilliga ku meelgaarka ah | 7 |
| Arday ka faidaysanaysa deeqda waxbarashada dowladda | 8 |
| Doorka shirkadaha talefoonada Somaliland oo mudan in la garwaaqsado | 9 |
| UNPOS oo Soomaaliya gudaheeda joogta | 10 |
| La kulan Mama Caasho oo ah qof mucjisa ah oo Muqdisho joogta | 12 |
| Soomaaliya oo gole wasiiro cusub yeelatay | 14 |
| Codka dadweynaha | 16 |



Tafaftiraha - Nick Birnback
Susannah Price

Qoraaga - Esther Njoki Mwangi

Tarjumeyaasha - Hussein Hassan
Abdullahi Abdinoor

Farsamayaqaanka - Lucie Sewe

Printing and Prepress: UNON/Publishing Services Section/Nairobi, ISO 14001:2004-certified



**Contact:** Public Information Office, United Nations Political Office for Somalia
Email: unpos_pio@un.org
Website: www.unpos.unmissions.org

## Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay oo ku kulmay



*Ergeyga Gaarka oo jooga Golaha Amaanka New York* UN Photo/Eskinder Debebe

Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ayaa kulan caadi ah loogana hadlaayay arrimaha Soomaaliya ku yeeshay magaalada New York 14kii September. Kulankan wuxuu ka dambeeyay warbixintii Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee ku saabsanayd Soomaaliya lana soo saaray 30kii August. Warbixintan waxay ka warramaysay xaaladda Soomaaliya 4tii bilood ee la soo dhaafay.

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Dr. Augustine P. Mahiga, ayaa Golaha Amaanka warbixin ka siiyay xaaladda Soomaaliya, wuxuuna aad u iftiimiyay dhibaatada bani-aadanimo ee dalka ka jirta. Wuxuuna tilmaamay in inkastoo uu gargaar soo gaarayo, Golaha Amaanka iyo bulshada caalamkuba waxay waxay u baahanyihiin inay fududeeyaan in gargaarka nolosha lagu badbaadiyo la gaarsiiyo goobaha ay abaartu saameysay iyo inay wax ka qabtaan dhibaatada abaaraha ka jira gobolka Geeska Afrika.

Dr. Mahiga wuxuu ku nuuxnuuxsaday guulaha wax ku oolka ah ee laga gaaray dhanka siyaasadda iyo amniga. Waxaana ka mid ahaa Kulanka Wadatashiga ee dhammeynta xilliga ku meelgaarka ah ee lagu qabtay magaalada Muqdisho laga billaabo 4tii ilaa 6dii September iyo ka bixitaanka Al-Shabaab ay ka baxeen magaalada Muqdisho inteeda badan. Wuxuu Golaha Amaanka ka codsaday inuu “madaxda Soomaaliyeed u diro farriin cad oo dhiirigelin ah isagoo isla markaana xusuusinaya inaan loo noqon karin khilaafkii siyaasadeed.” Wuxuu ka digay “inaan jiri doonin xilli kororsi dambe” wuxuuna ku dhiirigeliyay dhammaan dhinacyada ay arrintu khuseyso inay isla shaqeeyaan si xilliga ku meelgaarka loo dhammeeyo bisha August ee sannadka 2012.

Ra’iisal Wasaaraha Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka, Cabdiweli Maxamed Cali, ayaa sidoo kale Golaha warbixin siiyay isagoo xaqiijiyay in Xukuumaddiisu ka go’antahay inay hirgeliso Qorshe Hawleedka iyo inay qabato hawlaha mudnaanta leh ee amniga, isbedelka dastuurka, dibuheshiisiinta iyo maamul wanaagga intaan la gaarin 20ka bisha August ee sannadka 2012. Hase yeeshee, wuxuu sheegay in caqabado badan ay weli horeeyaan. Wuxuuna ku baaqay in taageero caalami ah si loo gaarsiiyo gargaar bani-aadanimo iyo amniga laga ma maarmaanka u ah xasilloonida Soomaaliya.

Ergeyga Gaarka ah ee Guddoomiyaha Guddiga Midowga Afrika, Boubacar Gaoussou Diarra, halkaas hadal ka jeediyay ayaa mar kale ku celiyay in Midowga Afrika uu Golaha Amaanka mahad uga hayo taageerada uu siinayo iyo dadaalka uu ugu jiro in wax laga qabto amaan darrada iyo xasillooni darrada ka jirta Soomaaliya. Wuxuu Golaha Amaanka ka codsaday inuu xayiraad dhanka badda ah ku soo rogo magaalada Kismaayo, inuu xayiraad duullimaadyada ah ku soo rogo hawada Soomaaliya iyo inuu dalka keeno ciidan nabad ilaalin ee raacsan Qaramada Midoobay sida uu codsaday Golaha Nabadda iyo Amaanka ee Midowga Afrika.

Dalalka xubnaha ka ah Golaha Amaanka ayaa soo dhoweeyay ansaxinta Qorshe Hawleedka lagu dhammeynayo xilliga ku meelgaarka ah, laakiinse waxay muujiyeen inay ka walaacsanyihiin dhibaatada bani-aadanimo. Xubnuhu waxay ballanqaadeen inay taageeraan Hay’adaha Federaalka Ku Meelgaarka ah iyadoo ku dadaalaya inay hirgeliyaan Qorshe Hawleedka. Hase ahaatee, waxay ku nuuxnuuxsadeen baahida loo qabo inay madaxdu isla xisaabtan la yimaadaan.

## Abaarta iyo macluusha waxay aad u waxyeeleeyeen carruurta Soomaaliyeed

Kumanaan Soomaali ah, oo barkoodu ay carruur yihiin, ayaa u dhimatay abaarta iyo macluusha ka jirta Soomaaliya. Inkastoo bulshada caalamku ay dadaal muujisay, haddana ma muuqato inay dhibaatadu dhowaan dhammaanayso. Sahan xog ururin ah oo dhowaan la sameeyay ayaa lagu xaqiijiyay in afar milyan oo dad ah ay hayso dhibaatadan waddankoo idil – tiradan waa laba jibaarka xaaladda siday ahayd billowgii sannadkan. Dad lagu qiyaasay 750,000 oo qof ay qarka u saaray inay u dhintaan macluusha bilaha soo socda. Laga soo billaabo dhammaadkii bishii September, waxaa koonfurta Soomaaliya ka jirtay lix goobood oo macluuli ka taagan tahay. Waxayna kala yihiin: Koonfurta Bakool, Bay, Shabeellaha Hoose, Shabeellaha Dhexe, iyo Degmada Afgooye – oo hoy u ah dadka dalka gudihiisa ka soo barakacay iyo barakacayaasha Muqdisho jooga. Dadka awoodi kara waxay ka tageen goobaha ay abaartu aadka u waxyeelleysay, dad lagu qiyaaso kun oo qof ayaa maalin walba soo gaaraya Xerada Dhadhaab oo ah xerada qaxootiga ugu weyn Adduunka, sidoo kale dad lagu qiyaaso 250 qof ayaa iyagana maalin walba soo gaaraya xeryaha qaxootiga ee Doolow Addo ee Itoobiya. Dad ka badan 100,000 oo qof oo barakacayaal ah ayaa soo buuxdhaafiyay magaalada Muqdisho, kuwaasoo ciriiri geliyay noloshii dhaqaalaha ee yarayd ee Muqdisho ka jirtay.

Carruurta ayaa si gaar ah ugu waxyeellowday dhibaatada. Labadii libood ee la soo dhaafay, tirada carruurta ah ee ay nafaqa darradu hayso waxy kor u kacday boqolkiiba 15 – tiradaasoo horey u hayd 390,000 ayaa hadda gaartay 450,000 badidooduna waa carruur joogta gobollada koonfureed.

Gargaar baa billowday inuu gaaro dadka. Saddexdii toddobaad ee u horeysay bishii September ayaa hay’adaha gargaarku waxay sheegeen in gargaar cunto ah la gaarsiiyay dad lagu qiyaasay 1.85 milyan oo kuwa dhibaateysan – tiradana waa kalabar dadka dhibaateysan.

Lama filayo xaaladda macluusha inay ka soo rayso mustaqbalka dhow. Intaa waxaa dheer, weli ma fududa in la gaaro dadka ay dhibaatadu hayso, waxayna xaaladdu u muuqataa in sicirka cuntadu uu kor u sii kici doono. Macluushuna waxay u muuqataa inay ku fidi doonto gobollo kale sannadkan dhammaadkiisa.

Qaramada Midoobay waxay ka digtay in billowga roobabku uu keeni doono faafidda daacuunka shuban biyoodka, jadeecada iyo mallaariyada, taasoo horseedi karta in dad badan oo la il darnaa macaluusha ay u dhintaan. Tani markay dhacdana carruurta ayaa noqon doona kuwa dhibaatada ugu weyn ay soo gaari doonto. Kumanaan dhallinyara ah oo wiilal iyo gabdhaba leh ayaa bukoonaya, boqollaal iyaga ka mid ahna waxay u dhimanayaan cudurro si fudud loo daweyn karo, sida jadeecada, mallaariyada, oof-wareenka iyo shuban biyoodka. Tan iyo bishii July ee sannadkan waxaa la soo sheegay 20,000 oo qof oo uu hayo cudurka Mallaariyada, kuwaasoo intooda badan ku nool koonfurta Soomaaliya. Arrintan waxay sababtay dhimashada dad ka badan 50 qof, badankoodu carruur yihiin. Afhayeenka Hay’adda Caafimaadka Adduunka ee

Soomaaliya, Pierter Desloovere, oo ka hadlay arrintay ayaa yiri: "Heerka dhimashada carruurka si naxdin leh ayay u kordheyaa. Jirka carruurta nafaqa darradu ay hayso iyo awooddooda iska difaacidda cudurrada aad buu u liidata iskamana difaaci karaan cudurrada."

Hay'adaha samafalka ayaa wada dadaal ay ku badbaadinayaan nafta dadka. Tan iyo horaantii bishii July, in ka badan 960,000 oo carruur ah ayaa laga tallaalay cudurka jadeecada. Hase ahaatee, goobaha caafimaadka ayaa aad loo buuxdhaafiyay. Isbitaalka Banaadir ee magaalada Muqdisho ayaa maalintiiba la seexiya boqolaal carruur ah. Dawn Blalock, oo ka tirsan Xafiiska Iskuxir Hawlaha Gargaarka Baniaadanimada oo booqatay rug caafimaad oo ku taalla caasimadda ayaa sheegtay in saraakiisha caafimaadka ee rugtaas joogay ayna adeegga caafimaad wada gaarsiin karin bukaanka. "Inta badan dhammaan carruurta la seexiyay isbitaalka toddobaadyadii la soo dhaafay ayaa la ildaran cudurka jadeecada. Waxaa qalbi jab leh in la arko carruurtii oo u dhimanaysa cudurro si fudud looga hortagi karo loona daaweyn karo.

Hay'adaha gargaarka ayaa u hawlgalaya sidii arrintan wax looga qaban lahaa loona kaalmeyn lahaa dadka aadka u dhibeysan. Baahida codsigii u dambeeyay ee gargaarka loogu dalbayay Soomaaliya ayaa ka badatay 561 milyan oo doolar Maraykan ah waxayna gaartay 1.06 bilyan oo doolar Maraykan ah. Qayb weyn oo codsigan ayaa la helay, waxaana laga helay deeqbixiyeyaal cusub iyo kuwii horeba. Isuduwaha Gargaarka Qaramada Midoobay, Mark Bowden, ayaa ka digay in xaaladda bilaha soo socda ay noqon doonto mid khatar ah. "Dhibaatadan ma aha mid dhammaaneysa goor dhow", ayuu yiri. "Weli waxaan u baahannahay dhaqaale si aan sare ugu qaadno hawsha oo aan sii wadno taageerada aadka loogu baahan yahay ee la siiyo dadka Soomaaliyeed.

## UNPOS oo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed u hirgelisay hanaan mushaar bixin ee hufan oo lala xisaabtami karo



*Wakiillada UNPOS, UNDP iyo AMISOM oo kormeeraya hanaanka mishear bixinta booliska*

Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS) oo la kaashanaya Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Horumarinta (UNDP) iyo Ciidamada Nabadilaalinta Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) ayaa ku guuleystay inuu hirgeliyo hanaan mushaarka lagu siiyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. Guusha tallaabadan waxaa qayb ka ahaa lacag dhan 10 milyan oo doolar oo dowladda Japan ay ku deeqday.

Isagoo la shaqeynaya UNDP, UNPOS wuxuu si dhakhso ah u billaabay inuu bixiyo lacagtaas 29kii bishii Luulyo iyadoo 300 oo askari ay qaadanayaan mishaarkooda maalintiiba. Ilaa iyo maanta, 1,120 askari oo boolis ah ayaa mishaarkooda si habsami ah u qaatay lixdii bilood ee la soo dhaafay.

"Waxaan ku faraxsanahay in bixinta mishaaraadku ay dabooshay baahida askarta booliska inta lagu jiray bishii Ramadaan, taageerana ka geysatay sare u qaadidda niyadda iyo anshaxa Ciidanka Booliska Soomaaliyeed," ayuu yiri Jonathan Sandy, oo ah la-guddoomiyaha Kooxda Shaqada Farsamo ee Booliska, ahna Madaxa Xafiiska Horumarinta Waaxda Amniga (SSDO) ee UNPOS.

Si loo fududeeyo habsami u socodka hanaankan, Kooxda Shaqada Farsamo ee Booliska ee Guddiga Wadajirka ee Amniga waxay sameysay guddi-hoosaad logu talagalay kormeerka, ilaalinta iyo hubinta bixinta mushaaraadka. Guddi-hoosaadkan, oo lagu magacaabo Kooxda Hubinta Caalamiga, wuxuu ka koobanyahay wakiillo ka kala socda AMISOM, Midowga Urub (EU), UNDP iyo UNPOS. Warbixinta maalinlaha ah ee xaaladda jirta ayaa lagu xaqiijiyaa in mushaaraadka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed loo bixiyo si hufan oo lala xisaabtami karo.

"Dhiggayga, Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Jeneraal Shariif Shekhuna Maye, aad buu ugu faraxsanyahay in ciidankiisu ay helaan mushaarkooda. Waxaan rajeynaynaa in bulshada caalamku ay sii wadi doonto taageerada ay siiso dadaalka aan ugu jirno xoojinta Ciidanka Booliska Soomaaliyeed," ayuu yiri Md. Sandy.

Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waxay u xilsaaranyihiin in waajibkooda sugidda amniga ay ka gutaan goobaha ay ka taliso Dowladda Federaalka KMG waxayna hadda ku hawlanyihiin hirgelinta qorshaha cusub ee amniga magaalada Muqdisho ka dib markii ay Al-Shabaab magaalada ka baxeen 6dii Agoosto 2011. Ilaa iyo manta, 3077 askari boolis ah ayaa bulshada caalamku tababartay iyadoo taageerna laga helay Qaramada Midoobay, Midowga Yurub, AMISOM iyo kuwo kaleba.

## Wakiillada maamul-goboleedyada hadda dhismaya oo kulmay



Ku-Xigeenka Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay Christian Manahl

Tan iyo dhammaadkii bishi Agoosto, hogaanka UNPOS waxay kulamo isdabajoog ah la yeesheen wakiillo ka kala socda maamullada ka dhismaya Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya. UNPOS wuxuu wakiillada ugu baaqayaa inay wadahadallo kala yeeshaan Dowladda Federaalka KMG sidii ay uga taageeri lahayd sameynta maamul-goboleedyo ay Dowladdu rasmi ahaan u aqoonsantahay.

26kii bishii Agoosto ee 2011 Ku-xigeenka Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya Christian Manahl ayaa shirguddoomiyay kulan loo qabtay 40 wakiil oo ka kala socda dhor ka mid ah maamul-goboleedyada iyo kooxaha siyaasadda iyo bulshada ee hadda dhismaya oo ka jira koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, wuxuuna ugu baaqay inay taageeraan geeddi-socodka nabadda Soomaaliya. Kulankan – oo ahaa kii ugu horeeyay oo noociisa ah – Md. Manahl wuxuu ugu baaqay kooxaha ka soo qaybgalay inay la shaqeeyaan Dowladda Federaalka KMG (TFG) si loo xasilliyo gobolladooda, loola dagaallamo kooxaha xagjirka ah waxna laga qabto dhibaatada ay keentay abaarta ka jirta Soomaaliya, isagoo tilmaamay in "siyaasadda uu jiro waqti la iskaashado iyo waqti la tartamo," haddana waxaa la joogaa waqtigii iskaashiga. Md. Manahl wuxuu sheegay in dadaallada ay wadaan Dowladda TFG iyo AMISOM ay u baahanyihiin dad taageera oo isbahaysi la yeesha oo gobollada jooga si looga hortago caqabadaha na horyaalla, gaar ahaan marka la eego xasilloonida sii kordheysa ee ka socota magaalada Muqdisho.

Ka qaybgalayaashu waxay soo dhoweeyeen tallaabadan oo, sida uu sheegay Ku-Xigeenka Ergeyga Gaarka ah, keentay fursad aad loogu baahnaa oo looga doodo arrimaha la wada daneeyo. Maadaama si fiican looga soo qaybgalay, waxaa la isku afgartay in kulamo kale la qabto. Md. Manahl wuxuu ka qaybgalayaasha ugu baaqay inay ku dhiirigeliyaan dhinacyada kale ee ay arrintu khuseyso inay wadahadallada ku soo biiraan.

Kulankii 26kii Agoosto ka dib, Ku-xigeenka Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu 8dii bishii September qabtay kulan kale ee ka soo qaybgaleen Wasiirada Soomaaliyeed ee Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka iyo Dastuurka iyo Dibuheshiisiinta. Kulankan, UNPOS iyo bulshada caalamkuba waxay Soomaalida ka qaybgalaysa u daayeen inay yeeshaan dood dhexdooda. Waxyaabaha ka soo baxay kulanka waxaa ka mid ahaa in Dowladda KMG ay ballanqaaday inay qabanqaabiso kulan dabagal ah ee ka dhaca magaalada Muqdisho.

Si doodan horey loogu sii wado, Ku-xigeenka Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay Christian Manahl wuxuu 8dii Oktoobar qabanqaabiyay kulan dhexmaray wakiillada maamullada dhismaya iyo Wasiirka Dowladda Federaalka KMG ee Arrimaha Dastuurka iyo Dibuheshiisiinta. Wadahadalladan Soomaalida dhexmartay waxaa diiradda lagu saaray arrimaha la xiriira tallaabooyinka loo baahanyahay in la qaado si loo dhiso maamul-goboleedyo. Waxayna isku afgarteen inay wadahadallada sii wadaan.

## Hay'adaha Qaramada Midoobay oo isula shaqeynaya si ay ula dagaallamaan burcad badedda



*Ciidan Faransiis ah oo gacanta ku dhigaya dad lagu tuhunsanyahay inay yihiin burcad badeed Soomaali ah ee Gacanka Cadmeed.*
*Photo: French Ministry of Defence*

Falalka burcad badeednimada ee ka dhacaya dhulka ka baxsan xeebaha Soomalia ayaa si isa soo taraysa u soo kordhay laga soo billaabo sannadkii 2008 sannadkaas oo ahaa markii si xoog leh dunida oo dhan aadka u dareentay dhibaatada bucad badeedda taasoo u dalacday heer caalimi, sababo amni iyo kuwo dhaqaale awgood. Labadii sanno ee u dambaysay, falka burcad badeednimadu wuxuu ku faafay dhamaan Badweenta Hindiya, dhinaca bari wuxuu gaaray waddan Hindiya, koonfurna wuxuu ku soo baahay ilaa iyo waddamada Muzambique iyo Koonfar Afrika . Falka bucad badeednimada wuxuu isku bedelay ganacsi weyn oo ku fidhiya dambiilanino, wuxuuna muujinayaa inuu xiriir is soo taraya la leeyahay Al-Shabaab. Hase ahaatee, arrimaha amaan darrada ka jira Soomaaliya dartood waxaa adag in Qaramada Midoobay iyo hay'adaha kaleba ay la shaqeeyaan waddanka si wax looga qabto arrimaha sababay burcadnimada.

Sida uu qabo Qaraarka Golaha Amaanka ee tirsigiisu yahay 1976. UNPOS waxaa loo xilsaaray inay door muhiim ah ka qaadato ayna ahaato meeshii lagala soo xariiri lahaa la dagaallanka burcad badeedda ka jirta Soomaaliya. UNPOS waxay hogaaminaysaa dadaalkii lugu dhisi lahaa xafiis wadajir ah oo ay Qaramada Midoobay leedahay qaabilsana arrimaha bucad badeedda kaasoo waqti dhow isu keeni doona saraakiisha qaabilsan burcad badeeda kana socda hay'adaha kale sida Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan arimaha Maandooriyaasha iyo Dembiyada iyo Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan Marinbiyoodyada Caalamiga ah iyo kuwo kaleba . Xafiiskan ama waaxdan cusub wuxuu ka dhex abuurayaa Qaramada Midoobay midnimo iyo hawlgal taasoo ogalaanaysa in si dhakhsa leh oo waxtar leh jawaab looga bixiyo arrimaha la xariira burcad badeednimada ka jirta Soomaaliya.
Waaxdan loo wada dhanyahay qaabilsana arrimaha burcad badeedda waxay isku xiraysaa dadaallada ku aadan wax ka qabashada burcad badeedda ee Dowlada Federaalka Ku-Meelgaarka Soomaaliyeed, maamul gobaleedyada Soomaaliyeed iyo dhammaan dalaka xubnama ka ah Qaramada Midoobay oo dhan si kor loogu qaado qorsheyaasha hadda socda iyo kuwa mustaqbalkaba. Waxaana dadaalladan ka mid ah in kor loo qaado awoodda wax qabasho ee garsoorka ee ku aaddan falalka dembiilenimada arrintan oo u ogolaanaysa inay burcad badeedda garsoor xaq ah ku helaan waddanka gudihiisa. Sidoo kalena arrintani waxay na tuseysaa in burcad badeed badan loogu xiro dalka gudihiisa maxaabiis ahaan, in la hormariyo arrimaha sharciga ah ee la xiriira burcad badeedda iyo in kaalmo la siiyo hay'adaha sharcifulinta Soomaaliyeed sida ciidamada ilaaliya xeebaha. Qorsheyaasha kale waxaa ka mid ah in la isku xiro hawlgalka ciidamada caalimiga ah, in la xoojiyo kalluumeysiga iyo maamulidda arrimaha deegaanka si wax looga qabto dhibaatada dadka Soomaaliyeed ka haysata kalluumeysiga sharci darrada ah iyo haraaga wasakhda sunta warshadaha ee lagu daadiyo badaha Soomaaliya iyo in la abuuro fursado dhaqaale, gaar ahaan in fursado shaqo laga abuuro dalka gudihiisa iyo in la qaado olale ummada lagula hadlayo. Waxaa jira xadgudubyo isa soo taraya oo loo geysanaya laguna afduubto shaqaalaha maraakiibta (hadda waxaa afduub loo haystaa 18 markab iyo 375 shaqaale). Waaxdan qaabilsan arimaha burcad badeedda waxaa kaloo ay ka shaqeyn dontaa iney soo gudbisp xadgudubyada xuququl insanka la galo

Qorshahan qaabilsan waaxda burcad badeedda wuxuu wadi doona baaritaankiisa waxaana laga maalgelin doona sanduuq caalami ah iyo kaalmo lacageed oo loo bixiyo heerka xiriirka u dhexeeya dowladaha. Abuuritaanka sanduuq caalami ah waa fikrad wanaagsan oo u ogolaaneysa deeq bixiyeyaasha iney ku soo shubaan lacagaha lagula daagaallamayo falalka la xiriira burcad badeedda. Wuxuuna siinayaa hey'adaha Qaramada Midoobey inay wada lahaadaan hal meel oo keliya oo ay kaalmo dhaqaale ku weydisan karaan. Maalgelinta arrintan waxay si dhab ah ugu suurtagelineysaa bulshada caalamka inay jawaab ka bixiso falka burcadnimada ah. Maaliyaddana waxay isla qiimeynaya Qaramada Midoobey iyo wakiillada ka socda waddamada deeq bixiyeyaasha kuwaasoo isla ogolaanaya dhaqaalaha la ballanqaadaya iyo sida uga fiican ee loo isticmaalayo. Waaxdan loo wada dhanyahay ee qaabilsan burcad badeedda waxay dooneysaa inay soo bandhigto tala soo jedin cusub, waxayna iskaashi la sameynaysaa hay'adaha Qaramada Midoobey, isla markaana waxay si wanaagsan ugu adeegeysaa bulshada caalamka si loola dagaallamo burcad badeedda ka jirta dhulka ka baxsan xeebaha Soomaaliya.

# Wadatashiga looga hadlay soo gabagabeynta xilliga ku meelgaarka ah




*Ra'iisal Wasaaraha Soomaaliya (midigta shishe), Madaxweynaha Dowladda KMG (ka labaad dhanka midigta), Guddoomiyaha Baarlamaanka (ka labaad dhanka bidixda) iyo Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay (bidixda shishe) oo joogа Kulankii Wadatashiga ee Muqdisho, September 2011*

Markii ugu horeysay, muddo afar sanno ah gudeheeda, ayaa shir weyne lagu qabtay magaalada Muqdisho inta u dhexeysay 4tii – 6dii September. Shirkan muhimka ah, oo lagu magacaabay Kulanka Wadatashiga ee Dhammeynta Xilliga KMG, ayaa isu keenay dhinacyada muhimka ah ee Soomaaliya si ay uga wadahadlaan wixii la qaban lahaa 12ka bilood ee soo socda.

Sida uu qabo Axdiga Federaalka KMG iyo Heshiiskii Jabuuti, waxay ahayd in xilliga KMG uu dhammaado bishii August ee 2011 – hase ahaatee, weli lama dhammeystirin inta badan hawlihii muhimka ahaa ee ku caddaa Axdiga. Bishii Juun, Madaxweynaha iyo Guddoomiyaha Baarlamanka ayaa go'aansaday inay "la shaqeeyaan bulshada caalamka si loo sameeyo qorshe hawleed leh hanaan isla xisaabtan waqtiyaysan, xambaarsana shuruudii lagu hirgelin lahaa hawlaha mudnaanta leh". Sidaa darteed, waxaa muhim ah in la qabto kulan wadatashi ee lagu go'aaminayo hawlaha lagama maarmaanka ah ee la doonayo in la qabto 11 bilood ee soo socda si loo dhammeeyo xilliga ku meelgaarka lana dejiyo hanaan waxtar leh ee lagu hirgeliyo arrimahan.

Marka la isu geeyo dad ku dhow qiyaastii 200 oo qof ayaa ka qaybgalay kulanka. Waxaana ka mid ahaa Madaxweyne Sheekh Shariif Sheekh Axmed, Guddoomiyaha Baarlamaanka Shariif Xasan Sheekh Aadan, Ra'iisal Wasaare Cabdiweli Maxamed Cali, Madaxweynaha Puntland Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud, Madaxweynaha Galmudug Maxamed Axmed Calin iyo ergooyinkooda, saddex ergo ee kala gedisan ee ka kala socota Ahlu Sunna Wal Jamaaca iyo tiro badan oo ka socota Bulshada Caalamka – oo ay ka midyihiin wakiillo ka socda Midowga Afrika, AMISOM, Midowga Yurub, IGAD iyo Jaamacadda Carabta. Dhammaan dhinacyada ka qaybgashay kulanka waxay muujiyeen rabitaan ay u qabaan inay wada shaqeeyaan iyo inay heshiiyaan.

Xafladdii furitaanka maalintii koowaad ee kulanka waxaa lagu qabtay Aqalka Baarlamaanka ee qaarkiis dayactir lagu sameeyay ee magaalada Muqdisho – tasoo ahayd arrin aan maskaxda ku soo dhici karin dhowr biloow ka hor waqtigaasoo magaalada inteeda badan ay gacanta ugu jirtay kooxda Al-Shabaab. Maalintii labaad iyo tii saddexaad ee kulanka waxaa lagu qabtay dhismo si gaar ah loogu dhisay hawlaha shirarka ee ku yaalla Garoonka Diyaaradaha agtiisa lehna qol uu ku rakibanyahay qalabka video-ga la iska arko oo loogu talagalay inay fariirsaan dadka meel ay fariistaan ka waayay qolka weyn ee shirka. Hawlaha kulanka waxaa aad ula socday soona tebinayay warbaahinta Soomaaliyeed iyo tan caalamkaba.

Gebagebadii kulanka waxaa lagu ansaxiyay "Qorshe Hawleed" leh hawlo muhim ah ee la doonayo in la hirgeliyo inta ka horeysa 20 August 2012, hawlahaasna waxaa look ala qaybin karaa afar qaybood oo waaweyn: Amniga, Dastuurka, Dibuhabaynta iyo Doorashooyinka, La Xiriirka iyo Dibuheshiisiinta iyo Maamul wanaagga. Hawlaha sida gaarka la isaga doonayo waxaa ka mid ah ansaxinta Qorshaha Qaran ee Amniga iyo Xasillinta, tallaabooyin lagu dagaallamayo burcad badeedda, ansaxinta dastuurka cusub, dibuhabayn lagu sameeyo baarlamaanka, doorashooyin la qabto, qorshe dibuheshiisiin qaran oo la diyaariyo, iyo in sare loo qaado hanaanka xisaabaha maaliyadda iyo in la sameeyo guddiga la dagaallanka musuqmaasuqa. Intaa waxaa dheer, waxaa jiray kulan gaar ah oo looga hadlay wax ka qabashada dhibaatada baniaadanimo ee hadda jirta.

Ka qaybgalayaasha kulanku waxay isku raaceen in muddoo 14 casho ah gudaheeda lagu sameeyo guddi farsamo oo gacan ka geysta sidii loo hirgelin lahaa qorshe hawleedka. Dhammaadka bisha September hay'adaha federaalka KMG iyo bulshada caalamka waxaa laga filayaa inay la yimaadaan qorshe dhaqaale loogu ururiyo qorshe hawleedka.

Kulanka waxaa soo abaabulay Guddi Qabanqaabo oo ka koobnaa wakiillo ka kala socday Dowladda Federaalka KMG, Baarlamaanka Federaalka KMG, iyo dowladgoboleedyada Puntland iyo Galmudug oo dhowr jeer kulan ku yeeshay Nairobi iyo Muqdisho. Guddigu wuxuu isku raacay in la qabto kulan labaad ee wadatashi ah oo inta badan ay ka soo qaybgeli doonaan xubnaha bulshada rayidka.

Kulankii koowaad ee wadatashiga ayaa dardargeliyay geeddi socodka nabadda. Waxaa hadda jira rajo cusub iyo yididiilo. Isagoo la hadlaya Golaha Amaanka ee magaalada New York 14ka September, Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay Mahiga wuxuu yiri "Tani waa fursad dhab ah ee loogu dhammeeyo xilliga ku meelgaarka si mas'uulnimo ah oo wax ku oolna ah. Tani way ka duwan tahay dadaalladii horey loo sameeyay maxaa yeelay hadda waxaa jira isafgarad ballaaran iyo rabitaan siyaasadeed". Waddada naga horeysa way caddahay."

# Arday ka faidaysanaysa deeqda waxbarashada dowladda

Dowladda Soomaaliya ayaa bishii Luulyo tallaabo u qaaday sidii ay u maalgelin lahayd dadka mustaqbalka iska leh iyadoo banaanka iska marinayso musuqmaasuqii lagu sheegayay wasaaradaheeda. Xukuumaddu waxay tallaabadan qaaday mar ay kormeeraysay imtixaano laga qaadayay arday Soomaaliyeed si loo soo xulo ardada ka fa'idaysanaysa deeqda waxbarashada dowladda.

Tallaabadan, oo ah tii ugu horaysay oo nooceeda ah kana dhacda dalka dibadiisa, ayaa soo jiidatay tiro arday ah oo ku dhow 1000 arday oo soo dhammaysay dugsiyada sare ee ku yaalla Soomaaliya, Kenya iyo Itoobiya si ay uga qaybqaataan imtixaanka. Dadaal kale oo kan la mid ahna waxaa laga waday Yaman. Hase ahaatee dadaalkani wuu dhicisoobay amaan darrada hadda ka jirta Yaman awgeed.

Waxaa murugo leh in dhowr ka mid ah ardadii rajeynaysay in la fa'iideystaan deeqda waxbarasho ee Turkiya ay ka mid ahaayeen dadkii ku dhintay qaraxii ismiidaaminta ahaa ee 4tii Oktoobar lagu qaaday magaalada Muqdisho iyagoo ku sugaya Xarunta Wasaaradda Waxbarashada.

In ka badan 324 oo arday oo jooga Nairobi, Kenya, iyo xeryaha qaxootiga ee Dhadhaab iyo Kaakuma ayaa imtixaan ugu fariisatay Safaaraddii hore ee Soomaaliya ee ku taalla Nairobi 14 bishii Juun 2011. Dhacdadani waxaa goobjoog ka ahaa warbaahinta iyo mudanayaal kale ee uu ka mid yahay Ergeyga Gaarka



*Xasan Cali Faarax oo ah arday doonaya deeq waxbarasho*

ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Arrimaha Soomaaliya Dr. Augustine Mahiga. Isagoo ka hadlayay arrintan, Dr Mahiga wuxuu



*Arday Soomaaliyeed oo ka qaybgalaysa imtixaan loo galay deeq waxbarashoo ee ay dowladdu bixiso*

> "Anigoo ah Ergeyga Gaarka ah ee QM u qaabilsan Soomaaliya, laga billaabo manta, waxaan Adduunka u sheegi doonaa inay dhallinyarada siiyaan fursado waxbarasho"

amaanay wasiirkii hore ee tacliinta sare ee Soomaaliya, Mudane Cabdinur Sheikk Maxamed oo si hufan oo cad u maamulay deeqda waxbarashada. "Wuxuu qabtay wax aan hortiisa qofna ka qaban arrimaha waxbarashada 20kii sanno ee la soo dhaafay. Deeq waxbarasho weligeedba way jirtay, ardayna weligood way jireen, wasiirana weligood way jireen laakiin isaga oo keliya ayaa deeqdan waxbarasho u maamulay si cadaalad ah oo hufan loona siman yahay," ayuu yiri Dr. Mahiga.

Isagoo amaanaya dhalinyarada Soomaaliyeed, Dr Mahiga wuxuu yiri, "Aniga sidaan idiin arko waxaad matashaan sedax arrimood. Waxaad u taagin tihiin adkaysiga iyo soo kabashada ay leeyihiin dadka Soomaaliyeed, dhibaato kasta oo idin qabsata waad ka badbaadaysaan. Waxaad u taagan tihiin ummad Soomaaliyeed oo leh go'aan iyo nidad ay ku noolaato. Waxaad tihiin dad go'aan leh ee qofna idiin ma cabsigelin karo waxaadna u taagan tihiin rajo.

Mid ka mid ah ardayda u fariisatay imtixaanka, Xasan Cali Faarax oo 22 jir ah oo ku noolaa Xerada Qaxootiga Xagarddeer, Dhadhaab, ilaa iyo intuu Soomaali ka soo cararay sannadkii 1992 ayaa amaanay howsha imtixaanka loo fariisanayo, wuxuuna yiri, "Ogeysiis ayaan ku arkay Internet-ka waxaana soo gudbiyay magacayga. Haddii aan ku guuleysto deeqda waxbarasho waxaan baran doonaa horumarinta bulshada. Markaan dhammeeyana waxaan ku noqon dooonaa Soomaaliya haddii ay nabadi jirto.

Danjire Mahiga wuxuu ballanqaaday inuu horumariyo waxbarashada dhalinyarada Soomaaliyeed wuxuuna yiri, "Anigoo ah Ergeyga Gaarka ah ee Arrimaha Soomaaliya, laga billaabo maanta waxaan adduunka u sheegaya in dhalinyarada Soomaaliyeed la siiyo fursado waxbarasho". Wuxuu ballanqaaday inuu la xiriiro jamacadaha ku yaalla Yurub, Autaralia iyo Waqoyiga Amerika, iyo weliba waddamada gobolkaba isagoo ardada soomaaliyeed u codsanaya dhaqaale iyo fursado waxbarasho. "Waxaan rabaa inaan xaqiijiyo inaad heshaan tacliinta ugu fiican, maxaa yeelay waxaad kari kartaan inaad baratan tacliinta ugu fiican waxaadna mudantihiin inaad heshaan tacliinta ugu fiican."

Si loo soo xulo ardada waxaa loo baahday inay u fariistaan imtixaan qoraal ah. Waxaa imtixaankii ka gudbay 90 arday oo ka mid ahaa 324 tii arday ee imtixaanka u fariisatay, ardadan imtixaanka ka gudbay waxaa deeq waxbarasho laga siinayaa macaahidda tacliinta sare ee Soomaaliya ama waddamada kale sida Suudan Turkey, Pakistan iyo Yaman.

# Doorka shirkadaha talefoonada Somaliland oo mudan in la garwaaqsado

W.Q. Mustafa Cabdi oo Somaliland Jooga iyo Esther Njoki Mwangi oo Nairobi Joogta




*Madaxa Xiriirka Dadweynaha ee Telesom, Mustafa Adam Muuse*

Gobol ay ka jirto colaad joogta ah ayaa dhinaca kale wuxuu leeyahay caasimad yar oo leh dhaqale shaqeynaya. Fal dembiyeedyada ka dhaca caasimadan aad bay u hoseeyaan waxaana ka jira nabad. Inkastoo dhaqaala ka jira caaasimadani uusan la mid ahayn dhaqaalaha ka jira caasimadaha waaweyn ee gobolka, haddana shirkadaha talefoonada soo koraya ee ka jira ayaa magaaladan ka dhigaya mid ka muuqata gobolka lehna suuq istaraatijiyad ahaan soo koraya.

Hargeysa waa magaala madaxda Somaliland oo ah gobol ka goostay Soomaaliya. Halkan (Somaliland), waxaa ka jira sedax shirkadood oo talefoono ah: Telsom, Somtel iyo Telecom oo ku tartamaya si ay ugu adeegaan dadka gaaraya 3,500,000.

Shirkada Telsom ayaa hormuud u ah shirkadaha taleefonada, waxayna leedahay macaamiil tiradooda ay dhan tahay ilaa 400,000 (afar boqol oo kun), sidaana waxaa sheegay war dhowaan ka soo baxay wargeyska Financial Times. Shirkadani waxay ka mid tahay shirkadaha ugu waaweyn Somaliland ee sida gaarka ah loo leeyahay. Shirkaddan oo la aasasay sannadii 2001-da ayaa leh adeegyada caadiga ah sida taleefonada xariga, Internet iyo talefonada leh adeega wareega.

Shirkaddan waxaa kale oo ay leedahay adeegyo khaas ah sida lacag ku xawilaadda mobilka lana yiraahdo adeega ZAAD. Arrintan waxay u suurtagelinaysaa macaamiisha inay lacagta ku jirta xisaabtooda xawilaan, wax ku gataan, ku bixiyaan deymanka isla markaana taleefanadooda ugu iibsadaan waxa waqitaga hadalka ee lagu magacaabo airtime habka ZAAD ee Telesom waa adeega keliya oo si xor ah lacag loogu xawili karo ee jira.

Shirkadda taleefanada SOMTEL ayaa ah iyana shirkad kale oo muhiim ah kana jirta Somaliland. Shirkaddan waxaa la aasaasay muddo hal sanno laga joogo waxayna hadda ku faantaa inay leedahay macaamiil gaaraya 120,000 oo qof. Waxay qabataa adeeg la mid ah shirkadaha iyada la tartaama sida talefana xariga iyo intermet Si ay ula tartanto shirkada sida aadka ah u hirgashay ee TELSOM, shirkada Somtel ayaa waqti dhow ku dhawaaqday inay samayn doonto habka lacag ku dirashada mobileka E-Dahab, taasoo waqti dhow hirgeli doono.

Madaxa xiriirka dadweynaha ee shirkada Telesom, Mustafe Aden Muuse, ayaa tilmaamay koritaanka shirkadaha Taleefana ee ka jira Somaliland inay ugu wacan tahay suuqa xorta ah ee ka jira gobolka. Wuxuu yiri fursadda ka jirta gobolka waxay u suurtagelsay ganacsatada inay la soo degaan farsamada ugu casrisan dunida taasoo soo jiidanaysa macaamiishooda.

Mudane Muuse wuxuu aad ugu rajoweyn yahay in koritaanka shirkadaha uu socon doono "waxaan rajaynaynaa in shirkadaha talefoonada ka jira Somaliland ay noqdaan kuwa ugu ballaaran Africa ama ay u weynaadaan sida kuwa ka jira Yurub iyo Ameerika", ayuu yiiri Muuse. Aragtida Muuse maahan mid la baciidsan karo. Kenya, oo ah wadanka dhaqaale ahaan gobolka ugu weyn ayaa leh afar shirkadood oo talefan kaliya, kuwaasoo u adeega dad gaaraya ilaa 40,000,000 haddaba arrintan haddii la barbardhigo sadexda shirkadood ee talefan ee ka jira Somaliland una deegayaa macaamiisha gaareysa 3,500,000.

Shirkadaha Taleefanada ee ka jira Somaliland weli ma ayna gaarin heerka tartan ee ka jira shirkadaha talefanada Kenya, hase ahaatee, shirkadaha taleefana Somaliland aad uma dambeeyaan maaddaama kuwa Kenya ay leeyihin maalgelin dhaqaale oo weyn, macaamiil fara badan iyo iyagoo suuqa mudo dheer ku jirey.

Shirkadaha Caalamiga ah ayaa isha ku haya dhaqaalaha soo koraaya iyo fursadda ka jirta Somaliland. Bartamihii bisha May, shirkadda soo saarta cabitaanka ugu badan COCA COLA ayaa ogolaatay shati ama rukhsad lagu maalgelinayo Somaliland, hase ahaatee tallaabada ay qaaday COCA COLA waxaa laga yabaa inay muddo dheer qaadato si loo soo jiito kalsoonida maalgeliyeyaasha oo ay si aad ah u dhaawacday xasilooni darrada ka jirta koonfurta.

Shirkadaha taleefanada ayaa weli hubinaya sidii ay uga faa'ideysan lahaayeen suuqan ka jira Somaliland marka ay ugu dambeyntii sameeyaan maalgelin. Agaasimaha waaxda hawlgalka ee Somtel Cawil Sheekh Saalax ayaa yiri: Shirkadaha taleefanada way ka faa'idi karaan haddii ay halkan maalgeshtaan, waxaan ku jirnaa casrigii isdhaafsiga xogta ay fududeyd sidaasi darteed howlaha oo dhan waxay ku tiirsan yihiin taleefoon. Mudane Muuse oo ka socda shirkada Telsom ayaa yiri: "Waxan ku faraxsanahay in shirkadaha caalamiga ay ogyihiin danaynayaana fursada ka jirta somaliland ayna doonayaan inay halkan maalgeshtaan shirkadahaasi waxay marka u dambeysa noqon doonaan macaamiisheena."

# UNPOS oo Soomaaliya Gudaheeda Joogta

W.Q. Kiyoshi Matsukawa

*This article first appered in the UN Department of Political Affairs Politically Speaking Bulletin.*

*Inkasta oo dhibaatooyinka amni la'aantu ay dhibaato ku yihiin ka shaqeynta Soomaaliya gudaheeda haddana, Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaalia (UNPS) ayaa kordhinaya joogitaankiisa waddanka gudihiisa taasoo looga danleeyahay in gacan laga geysto habkii xasillooni siyaasadeed iyo dib u soo kabasho dalka iyo dadka Soomaliyeed u heli lahaayeen.*

*Waxaa hadda xafiiska UNPOS madax ka ah Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Augustine P. Mahiga. Xafiikan Qaramada Midoobay wuxuu u fududeyay dadka Soomaaliyeed inay gaaraan heshiisyo siyaasadeed oo muhiim ah sida Heshiiskii Nabadeed ee Jabuuti iyo Isafgaradkii Kambalaee dhacay bishii June 2011, loona habeeyay in lugu soo gebagebeeyo xiliga maamulka ku meelgaarka. UNPOS waxaa kaloo ay ku dedaashay habkii loo hormarin lahaa maalgashiga Soomaaliya, taasoo ah mashiinkii dhaqaajin lahaa koritaanka iyo xasillooni ku soo dabaalista wadankan ay dhibaatada heysato.*

*Waxaa aragtidiisa qof ahaaneed ee ku saabsan Mugdisho halkan nooga soo gudbinaaya nin ka mid ah shaqaalaha UNPOS oo la yiraahdo KIYOSHI Matsukawa, oo shaqadiisa ay tahay Qorsheynta iyo isdubaridka hormarinta dhaqaale iyo qorshooyinka kusaabsan nolol maalmeedka. Qofkan shaqaalaha ah ayaa nooga warramaya wax yar oo ka mid ah waaya aragnimadiisa ku saabsan dhinaca nolosha iyo u shaqeynta Qaramada Midoobay ee looga shaqaynayo iyadoo la joogo caasimadda ay degaalladu halakeeyeen ee* Mugdisho (waa tan sheekadiisa)




*Kiyoshi Matsukawa, hawlwadeen qorsheyn ee UNPOS, oo Muqdisho jooga*

Diyaaradii ay Qaramada Midoobay soo kiraysatay (ee uu saarnaa) ayaa bilowday inay isa soo gaabiso oo ay ku duusho jog gaaban markii ay biloowday inay dulmarto Biyihii midabkooda buluuga ahaa (xeebta Soomaaliyeed) diyaaradduna waxay sidaa u yeeshay inay ka badbaaddo haddii xabad looga soo tuuro xeebta Soomaaliya inta ayna diyaaraddu cagaheeda taabanin Garoonka Mugdisho. Waxaan dib ugu soo noqday Xamar oo ah magaca ay dadka waddanka u dhashay ugu yeeraan caasimadda, waxaana mooganaa Mugdisho muddo toddoba sanno ku dhowaad muddadaas oo ay wax badan iska bedeleen caasimadda. Sannadii 2004 oo ahayd markii iigu horeysay ee aan imaado Soomaaliya anigoo cilmi baaris waxbarasho wado ayaa xaaladda Garoonka Caalimiga ee Mugdisho, sida Dekadda Xamarba ahayd, waxaa uu ahaa mid lagu muransan yahay maadaama qabqablayaashii dagaalka ee xilligaas jiray ay ku heshiin waayeen sidii loo maamuli lahaa goobahaasi, toddoba sanno kadib, garoonka diyaaraduhu wuxuu gacanta u soo galay Dowlada Federaalka Kumeelgaarka iyo ciidimo nabadilaaliyaal ah oo ka socda waddamada Ugaandha iyo Burundi ee kamid ah hawlgalka Ururka Midowga Afrika ee Soomaaliya ( AMISOM)

Islamarkii diyaaradda cagaheedu ay taabteen garookan, saraakiisha Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha amniga ayaa degedeg noola soo orday Baabuurta Gaashaaman si ay meeshaas noogala cararaan halkaaasoo ay ku soo degayeen diyaarado badan ee ganacsi ah. Halka ay shaqaalaha Qaramada Midoobay ka degayaan magaalada Mugdisho kala xulusho badan ma laha waxayna ku kooban yihiin labo goobood oo ku yaalla garoon diyaaradaha dhexdiisa, kuwaasoo wax yar uun ka duruqsan halka ay diyaaraduhu caga dhigtaan. Haddaba waxaa qolkii aan seexanayay ii noqday mudo dhowr usbooc ah qol ka sameysan kunteynar cabirkiisu yahay 2x3 mitir, kaasoo ay u dhammaayeen qabayskii, dhar dhaqashadii iyo meeshii lugu kaawadayn lahaaba . Qolka waxaa kale uu lahaa Internet oo fiilo la'aan ah. Waxaa kaloo aan helaynay cunto malintiiba sedax jeer ,

Maadaama aan ahay sarkaal UNPOS u qaabilsanaa arrimaha qorshaynta, waxaan ka mid ahaa wefdi wadajir ah ee ka tirsan Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan iskuxirka arrimaha gargaarka si aan markaas u diyaarino qorshaha Qaramada Midoobay ee ku aadan wax ka qabashada Mugdisho sida qashin ka sifaynta magaalada, rinji marinta dhismiyaasha iyo dib u dhiska suuqyada.
Anigu shaqadayda gaarka ah waxaa ay ahayd sidii ganacsatada ay kaalin uga qaadan lahaayeen qorshaha dib u soo kabashada iyadoo loo marayo arirntan habkii loo heli lahaa ganacsato yaryar iyo kuwo leh ganacsi heerkiisu yahay mid dhaxe. Sida arrintan loo helo waxaa loo baahnaa in la ogaado bulshada ganacsatada, saraakiisha dowladda iyo ururrada NGO-yada waddanka jooga. Dhibka ugu badan wuxuu ahaa sidii lagula kulmi lahaa dadka . Arrintan annagu ma aanan lahayn kala doorasho weyn ee waxaa noo furnaa in dadka ganacsatada ah inay yimaadaan Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Mugdisho anagoo naftooda khatar gilanayno ama inaan aadno meelo ka baxsan garoonka oo ay horay u ogolaadeen tagitaankooda saraakiisha Qaramada Midoobay u qaabilsan arimaha amniga. Meelahaasna waxaa ka mid ahaa Xafiiska Ra'iisal Wasaaraha, annaga oo weliba ay nagalbinayaan Baabuurta Gaashaaman ee AMISON. Socodkan (magaalada dhaxdeeda ah) wuxuu u baahan yahay qorshe tafaftiran iyo in si joogta ah loo qiimeeyo xaalada amniga. Inkasta oo ay jireen dhibaatadan amniga iyo saadkuba ku saabsan haddana shirkeena wuxuu ahaa mid aad u guulaystay. Soomaalidu waa dad ku fiican ganacsiga waxayna leeyihiin xog farabadan oo ay nala wadageen ilaa ay naga qanciyeen. In kastoo aan helno xog farabadan oo ku saabsan Soomaaliya haddana ma jirto wax lugu bedelan karo in la tago goobta ama waddanka si markaasi loo helo xog dhab ah xaalada sida ay tahayna loo dareemo .

Inta badan ganacsiga gaarka loo leeyahay ee aan araknay waxay ahaayeen ganacsi ay leeyihiin dadka dibadda ka soo noqday kuwaasoo qabanaya ganacsi ku fadhiya adeegsida maqaaxyada, huteellada, iyo ganacsato soo dejinaysa cuntada daruuriga ah. Waxaa kaloo aan wadahadal fiican la yeelanay xafiiska duqa magaalada Mugdisho, wasiirka hawlaha guud, wasiirka isgaarsiinta iyo

wasiirka maaliyadda. Waxaa kaloo aan la kulannay NGO-yo ka shaqeeya arimaha haweenka, kuwo baniaadinamada iyo sidii lugu qaybin lahaa gargaarka.

Waxaa cad inay arimuhu ku xiranyihiin dadka Soomaaliyeed si ay u abuuraan xaalad ay ku kobcikaraan ganacsiga yaryar iyo kiise dhexe shaqana lagu abuuri lahaa hormarkana lagu jogtayn laha. Dadka qurbajoogta ah waxay u baahan yihiin inay helaan jawi ay raalli

> "Waxaa muuqata in loo baahanyahay inay Soomaalidu diyaariyaan jawi lagu abuuri karo ganacsi yaryar iyo mid dhexdhexaadba"

ka noqon karaan si ay u soo noqdaan una maalgeliyaan Muqdisho. Waxaa loo baahanyahay in la abuuro jawi uu ganacsigu ku kobci karo iyadoo wadatashi dhow lala samaynayo dowladda. Si dhab ahaan loo hormariyo qeybta ganacsiga, waxaa loo baahan yahay in la helo awood koronto oo joogta ah lagu kalsoonaan karo qiimaheduna jaban yahay. Waxaa kaloo loo baahanyahay in la hormariyo warshadaha wax soo saara. Dhaqaalaha hadda jirana waa mid ku qotoma in waxkasta dibadda laga keeno. Dad badan oo ganacsato ah oo aan lahadalnay waxay ka cowdeen gaar u waardiyaynta hantidooda (maleeshiyada sida gaarka ah loo kireeysanayo si ay u ilaaliyaan hantida) iyo siday faa'ido u heli lahaayeen iyadoo arrintan ay dulsaarantahay. Waxaa la ii sheegay qorshe kasta oo ganacsi ah ee la dejiyaba 20% inuu guuldareysto. Haddaan si kale u iraahdo arrimaha amniga ee Muqdisho hormar ayay hada sameeyen. Dowladda iyo AMISOM baa qaybo farabadan ka xureeyen Al-Shabaab sannadan. Booqasho aan ku tagay Dekadda iyo magaalada gudaheedaba waxay ii korarsiisay waayo arignimo yaab leh madaama toddoba sanno ka hor dhulka hadda aan sheegayo aan la tegi karin halkaasoo khadkii cagaarnaa ee aan la jeclayn magaalada Muqdisho u kala qeybin jiray waqooyi iyo koonfur oo ay gacanta ku hayeen labo qabiil. Hadda nalalkii waddooyinka ayaa lashiday,waxaa socda dayactirka waddooyinka dadkana dhalooyinkii burburay ayay ka xaaqeen wadooyinka -dhab ahaantii waa calaamad noo xaqiijinaysa in arrimaha amniga dib loo soo celiyay.

Arrin markii hore ahaan jirtay dhibaato yar oo ka dhaxeysey qabiilo dagaalamayay ayaa maanta u muuqata mid aad u dhib badan, waxana jira qoryo badan iyo dad farabadan oo taageersan nabadda ama kasoo horjedaba.
Hormarka laga sameeyay dhinaca amniga ka sokow, geedi socodka nabadda ayaa isagana horay u tallaaba qaaday. Isafgaradkii Kampala ee la saxiixay bishii Juun ayaa gacan ka geystay i uu isu keeno madaxda Soomaalida. Waxaa hadda laga filayaa inay iskala shaqeeyaan qoritaanka dastuurka, arimaha dib u dhiska iyo horumarinta arrimaha amniga iyo ugu dambeyntii inay iskala shaqeeyaan sidii loo qaban laha doorashooyin.

Ergeyga Gaarka ah Mahig ayaa waxaa ka go'an inuu dadka Soomaaliyeed ula shaqeeyo si dhow. Dhowr jeer ayuu shakhsi ahaantiis magaalada muqdisho socdaal ku tagay. Intaas waxaa dheer sedax meelood meel k amid ah shaqaalaha UNPOS ayaa ka guuraya saldhigooda Nairobi oo u guuraya gudaha Soomaaliya sida Muqdisho,Garoowe, Puntland iyo Hargeysa, Somaliland. Arrintani waxay u fududeyneysaa shaqalaha inay si dhow ula shaqeeyan mas'uuliyiinta iyo dadka Soomaaliyeed, waxayna kasbanayaan waya arignimo la xiriirta nolosha ka jirta Soomaaliya, waxayna si waxtar leh ugu hoolgalayaan sidii ummadda Soomaaliyeed dhammaantood u heli lahayeen mustaqbal ifaya. Waxaa xiiso isla markaana ah waxa lagu farxo in qayb laga noqdo hormarka socda.



*Ciidanka AMISOM oo hawlgal ka haya Muqdisho*

# La Kulan Mama Caasho oo ah qof mucjisa ah oo Muqdisho joogta

W.Q. Esther Njoki Mwangi

Mama Caasho Cabdi Dini waa qof 62 jir ah oo leh sifooyin gaar ah oo ku soo jiidanaya. Sifooyinkaas ku soo jiidanaya oo ay leedahay ma aha keliya furfurnaanta iyo xushmada ay kugu soo dhoweynayso markaad la kulanto. Waxaa laga yaabaa waxyaabaha ku soo jiidanaya inay yihiin dhoollacadaynta ama iyadoon ahayn qof weji macbuus ah ama aan lahayn cabasho badan. Xitaa mar ay nooga shekaynaysay maalin uu nin qori ku qabtay, dareenkeedu waxba iska ma bedelin waxay ahayd qof degan oo farxadi ka muuqato.

Caasha oo loo yaqaano mama Caasha waxay madax ka tahay hay'ad samafal ah oo la yiraahdo Hay'adda Horumarinta Arimaha Bulshada Dhexdeeda (ICDS). Hay'addu waxay mas'uul ka tahay xarun hooyo iyo dhallaan kuna taalla degmada Xamar Jajab ee magaalada Mugadisho. Hay'addan waxaa wada asaasay iyada iyo ninkeeda sannadkii 1993 si loo caawiyo dadka danyarta ah eek u nool Xamar Weyne. "Waxaan furnay xaruntan ka dib markaan ogaanay inay dad badan noogu imanayaan si aan u kaalmayno", ayay tiri haweenayda ku takhusustay umulisonimada iyo nafaqada.

Xaruntan oo hadda ku dhow inay 20 jirsato ayaa malin walba adeeg u fidisa dad ka badan 100 oo bukaan socod ah. Xaruntan waxay leedahay waaxyo takhasus u leh daaweynta iyo daryeelka carruurta iyo haweenka uurka ah ka hor inta ayna dhalin iyo ka dib marka ay dhalaanba. Maalin walba xaruntu waxay si caadi ah u daweysa ilaa 40 carruur ah oo da'doodu ka yartahay 5 jir, 30 ilaa 35 oo ah haween uur ah ka hor inta ayna dhalin iyo 20 ilaa 25 oo ah haween uur ah ka dib marka ay dhalaan. Sidoo kalena maalin walba xaruntu waxay daweysa 20 bukaan oo xalkoodu uu degdeg yahay. Dadka bukaanka aan xaaladooda waxba laga qaban karin waxaa loo gudbiyaa isbitaallada waaweyn.

Shaqadan waxaa suurtageliyay koox ka kooban kalkaaliyeyaal caafimad iyo umulisooyin oo ku shaqaynaya si iskaaaga wax u qabso ah. Toddobaadkiiba hal mar waxaa xarunta yimaada dhakhtar qaabilsan carruurta iyo mid qaabilsan haweenka uurka ah si ay shaqo lacag la'aan ah xarunta ugu deeqaan.



*Mama Caasha Cabdi Diini oo joogta tababarkii farsamo ee haweenka ee lagu qabtay Nairobi*

Xarunta ICDS waxay kaalmo dhaqaale ka heshaa hay'adaha Qaramada Midoobay, siiba UNICEF oo si joogta ah u bixisa kaalmo ka kooban daawooyin iyo ololeyaasha tallaalka. Hay'adda Caafimaadka Aduunka iyo Hay'adda Qaabilsan Tirada Dadka ayaa iyana marmar kaalmo siiya xarunta.

> "Waxaan u jeedaa in nabaddu soo dhowdahay markii ugu horeysay 20 sanno"

Amnigu waa arrin welwel leh. Hase ahaatee, Mama Caasho wax weyn kama dhigin mar ay ka hadlaysay mar uu nin qori madaxa kaga qabtay isagoo lacag ka dalbanayay. Waxay sheegtay inayna ka welwelin amaankeeda maadaama ay ilaalin iyo badbaado ka hesho bulshada ay kaalmeyso.

Hadalkeeda murugo ayuu isu rogay mar ay tiri: "Marmar waxaa la arkayaa carruur ay macluul aad u daran hayso annagana aanan u haynin wax aan siino." Dhowaanahan oo ay jirto abaar daran xaaladdu hadda wayba ka sii dartay. "Nin ka cararaya abaarta wadanka ka jirta ayaa waxaa ka dhimatay saddex ka mid ah carruurtiisa oo wuxuu waayay xitaa awood uu ku aaso. Qiyaastii 15 ilaa 18 qof ayaa maalintiiba dhimata."

Marka ayna haynin hawsha xarunta, Mama Caasha waxay si xoog leh ugu dooddaa xaquuqda haweenka Soomaaliyeed. Waxay xubin ka tahay Ururka Isbahaysiga Haweenka ee lagu magacaabo (COGWO), oo ah shabakad ay leeyihiin 30 urur haween oo la asaasay 1996 loona asaasay inay u dooddo xuquuqda haweenka xarunteedana tahay magaalda Muqdisho. Mama Caasha waxay sheegtay in haweenka Soomaaliyeed ay yihiin kuwo u firfircoon geeddi socodka nabada Soomaaliyeed, waxayna marar badan dib-u-heshiisiin ka dhex sameeyeen dhinacyada iska soo horjeeda. "Waxaanu la hadalnaa dhinacyada dagaallama, maxaa yeelay waa wiilasheena iyo raggeena. Haweenku wa kuwa aadka dagaalku u saameeyo. Waana kuwa gacanta ku haya dhaqaalaha qoysaskooda. Raggii ama way dhinteen ama waa shaqa la'aan," ayay tiri. Dhinacyada dagaallama ma dhegeystaan marka la dhexgalo? ayaa la weydiiyay. Inta ay aad u qososhay ayay tiri: Maya."

Hase ahaate, dadaalladooda qaar ka mid ah way mirodhalaan. Tusaale ahaan, ka dib markii la saxiixay Heshiikii Kambala ee lagu dhammeeyay ismariwaa qaatay muddo shan bilood ah kana dhexeeyay Xukuumada iyo Golaha Sharcidejinta

ayaa Mama Caasha waxay ka mid ahayd Guddi ka socda bulshada rayidka ah ee loo xilsaaray inay la soo hadlaan Madaxweynaha iyo Goddoomiyaha Baarlamaanka. "Waan la hadalnay labadoodaba waxaana ka codsanay inay heshiis gaaran. Waxay noo ballanqaadeen inayna dagaallamaynin," ayay tiri.

Waxaan Mama Caasha kula kulannay magaalada Nairobi halkaasoo ay kaga qaybgalaysay tababar ay soo wada qabanqabiyeen UNPOS/UN Women oo ah Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan Arimaha Haweenka, tababarkaas oo ku saabsanaa sare u qadidda wacyiga haweenka Soomaaliyeed ee arrimaha nabadda. Tababarkan wuxuu dhacay intii u dhexaysay 13 iyo 15 Luulyo ee 2011. Ujeeddada tababarku wuxuu ahaa in lagu awood siiyo haweenka Soomaaliyeed isla markaana lagu eego siday uga qaybqaadan lahaayeen mustaqbalka arrimaha Soomaaliya ee nabadda. "Wax badan baan baranay. Garaadkeena kor buu u kacay. Tababarkani wuxuu nagu kaalmeynayaa sidaan u tababari lahayn haweenka kale markaan noqono," ayay tiri.

Mama Caasha nolasha dhinac wanaagsan ayay ka aragtaa. Waxaa laga yaabaa taas inay tahay waxa ka dhigaya inay ka mid noqotay dad tiro yar ee rayidka ah ee ku nool magaalada Muqdisho oo si dhab ah u aaminsan in dagaalkii 20kii sanno ee la soo dhaafay ka socday Soomaaliya uu hada yahay mid ku dhow inuu dhammaado. Sida caadiga ah hadalkan yididiilaha leh oo kale waxaa uun laga maqlaa nabadilaaliyeyaasha iyo saraakiisha dowlada. "Waxaa ii muqata inay nabad soo socoto markii ugu horeysay 20kii sanno ee la soo dhaafay," ayay ii sheegtay. Waxaan weydiiyay siday go'aankaas ku gaartay. Waxay tiri "AMISOM iyo askarta Dowladda ayaa hadda dib u riixaya dagaalyahanada Al-Shabaab. Hadday sidan ku sii wadaan, Al-Shabaab waxaa laga saari doonaa magaalada Muqdisho," ayay tiri. Markaa wax yar ayay aamustay iyadoo dhollacadaynaysa. "Xitaa haweenka kaalmo ayay ka geysan doonaan. Haddii la qabto magaalada Muqdisho, qabashada gobollada kale way fududaan doontaa."

Waxaa sheekada Mama Caasha ka dhigaya mid xiiso leh waxaa weeye inay dooratay inay ku noolaato magaalada Muqdisho iyadoo haysata fursad ay meel kale ku aaddo. Mama Caasha waa xaaska Saalax Maxamed Cali, oo ahaa danjire hore ee Soomaaliyeed, oo ka soo shaqeeyay waddamo badan sida Talyaaniga, Shiinaha iyo Ingiriiska xilligii uu jirtay dowladdii hore Maxamed Siyaad Barre. Intii ay la joogtay ninkeeda waddamadaas uu ka soo shaqeeyay Mama Caasha waxay waqtigeeda ku buuxisay waxbarasho – sida nafaqada ee ku baratay magaalada Rooma iyo habka irbad ku daaweynta ee loo yaqaano acupuncture ee ay ku baratay dalka Shiinaha. Danjire Cali oo ah qoraa soo saaray buugag badan wuxuu hadda ku noolyahay magaalada Qaahira.

Mama Caasha waa hooyo waxayna leedahay hal gabar iyo afar carruur ay ayeeyo u tahay oo hadda ku nool dalka Kanada. "Waxaan rabaa inaan noqdo sida Mother Teresa oo kale. Waxaan rabaa inaan kaalmeeyo dadka. Haddii aan Yurub ama Nairobi ku noolaan lahaa, aniga uun baa wax istari lahaa," ayay igu tiri.

Waxaa muuqata inaysan ku faraxsanayn booqashada ay ku joogto Nairobi maadaama ay marwalba hadal hayso dadka barakacaasha ay Muqdisho uga soo tagtay oo in badan oo ka mid ahi ay soo barakiciyeen abaaraha hadda jira. "Waxaan isu arkaa qof aan waxtar lahayn markaan halkan joogo. Xamar markaan joogo ugu yaraan dadbaan caawin karaa," bay tiri. Waxay ku dartay: "Fadlan ha illoobina Soomaaliya. Kaalmeeya Soomaaliya si ay khariidadda adduunka uga tirtirmin."

# Sare u qaadidda tayada nabadeed ee haweenka



*Mama Caasha iyo haweenka kale oo ka qaybgalaya tababarkii farsamo ee haweenka ee lagu qabtay Nairobi, Luulyo 2011*

# Soomaaliya oo gole sasiiro cusub yeelatay

W.Q. Esther Njoki Mwangi

Sida uu qabo Heshiiskii Kampala ee la saxiixay 9kii June 2011 Madaxweynaha Dowlada Federaalka Kumeelgaarka Somaliyed (TFG) Sheikh Shariif Sheikh Axmed ayaa magacaabay Cabdiweli Maxamed Cali si uu u noqdo ra'iisal wasaaraha cusub ee wadanka. Abdiweli wuxuu bedelay Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo) oo iscasilay si uu waddada ugu baneeyo hergelinta Heshiiskii Kampala.

Sidii uu ra'iisal wasaarihii isaga ka horeeyay sameeyay, ra'iisul wasaaraha cusub wuxu ku dhawaaqay xukuumad tira yar dadkeeduna ay aqoon yahan yihiin kana kooban 18 wasiir oo intooda badan ka timid dalka dibadiisa. Wasiirada cusub intooda badan waa wejiyo ku cusub dowladda maadaama uusan ku jirin cid horay ugu jirtay dowladdii hore ee Maxamed Cabdullahi Farmaajo.

Ururka qunyarsocodka ah dowladdana raacsan ee Ahlu Sunna Wal Jamaaca iyo maamulka goboleedka Punland ayaa la siiyay jagooyinka wasiirka arrimaha gudaha, caafimaadka, waxbarashada iyo dastuurka iyo dib u heshiisiinta. Arrintan waa tallaabo loola jeeday in laga dhigo xukuumada cusub mid siyaasad ahaan loo wada dhan yahay. Xukuumada cusub waxay ku dhisantahay habka awood qaybsiga qabiillada Soomaaliyeed ee 4.5 waxaana ku jira hal wasiir oo haweenay ah. Marka laga reebo labo wasiir (oo ah wasiirka cadaaladda, arimaha diinta iyo awqaafta iyo wasiirka shaqada, dhalinyarada iyo cayaaraha) wasiirada intooda kale kama tirsana Baarlamaanka.



*Ra'iisal Wasaare Cabdiweli Maxamed Cali oo shirguddoominaya kulanka Golaha Wasiirada, Muqdisho*

Bishii Luulyo 23keeda ayaa Baarlamaanka Federaalka KMG Soomaaliya xukuumada cusub ku ansaxiyay cod garaya 397 iyadoo ay diideen 21 xibnoon. Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Soomaaliya, Dr. Augustine P. Mahiga ayaa amaanay Baarlamaanka wuxuuna yiri: "Waxaan aad ugu faraxsanahay in Baarlamaanka Soomaaliyeed uu si dhaqsa leh ugu hawlgalay ansixinta dowlad uu soo dhisay ra'iisul wasaaraha.ansaxintuna waxay dhacday inta aysan dhammaanin muddadii ku cadayd Heshiiskii Kampala lagu soo garay. Arrintani waxay na tusaysa go'aan adag oo wax lagu dhisayo waxayna u tahay xukuumada cusub tallaabo bilow ah oo wax lagu dhisayo."



*Ra'iisal Wasaare Cabdiweli Maxamed Cali iyo Ergeyga Gaarka ah Mahiga oo ka qaybgalaya kulan ka dhacaya Muqdisho*

## Ra'iisul Wasare Cabdiweli Maxamed Cali

Inta aanan xilka loo magaacabin, wuxuu ahaa ra'iisul wasare ku xigeen isla markaasna ah wasiirka qorshaynta iyo iskaashiga caalamiga. Wuxuu ka soo jeeda Degmada Dhusamareeb ee Gobolka Galgaduud. Waana nin haysta dhalashada Maraykanka wuxuuna ku hadlaa Af-Soomaali, Carabi, Talyaani iyo Ingiriis.

Yaraantiisi Cabdiweli wuxuu ku noola Soomaaliya halkaasoo uu ka helay shahaadada jaamacadda ee bajilorka ah wuxuuna bartay cilmiga dhaqaalaha waxuuna shahaadada ka qaatay Jamacadda Umada Soomaaliyeed. Muddadii uu joogay dalka Maraykanka wuxuu Jaamacadda Harvard Universaty ka soo qaatay shahaadada mastariska isagoo ku takhasusay maamulka guud ka dibna Jamacadda George Mason ayuu wuxuu ka qaatay shahaadada PHD da sidoo kale wuxuu raacanayay maadoyin kale.

Inta uusan ku soo biirin siyaasadda Cabdiweli wuxuu ahaa nin dhaqaaleyahan ah wuxuuna macalin ka ahaa Jamacadda Niagara Universaty ee ku taalla magaalada Buffalo ee ka tirsan gobolka New York. Waxaa kaloo si guud ula shaqeeyay urarada caalamiga ah sida Qaramada midoobay iyo Bangiga Adduunka.

Markuu xilkiisa cusub la wareegayay, ra'iisul wasaaruhu waxa uu sheegay in ciribtirka musuqmaasuqa iyo hormarinta arimaha ciidamada uu xooga saari doono ayna ajandaha dowladiisa meel sare kaga jiri doonaan.

===>>

# Golaha Wasiirada

1 
**Md. Maxamed Maxamuud Xaaji Ibraahim,** Ku-Xigeenka Ra'iisal Wasaaraha iyo Wasiirka Arrimaha Dibadda

2 
**Md. Xuseen Carab Ciisa,** Ku-Xigeenka Ra'iisal Wasaaraha iyo Wasiirka Gaashaandhiga.

3 
**Md. Cabdiwahaab Ugaas Xuseen Ugaas Khaliif,** Ku-Xigeenka Ra'iisal Wasaaraha iyo Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha

4 
**Md. Axmed Xasan Gaboobe (Ugaas Bille),** Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Awqaafta.

5 
**Md. Cabdisamad Macalim Maxamuud Sheekh Xasan,** Wasiirka Arrrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka.

6 
**Md. Dr. Cabdinaasir Maxamed Cabdulle,** Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta.

7 
**Mw. Maryan Aweys,** Wasiirka Haweenka iyo Arrimaha Qoyska

8 
**Md. Cabdullaahi Xaaji Xasan Maxamed-Nuur,** Wasiirka Beeraha iyo Xanaanada Xoolaha.

9 
**Md. Dr. Cabdicaziz Sheekh Yuusuf,** Wasiirka Caafimaadka.

10 
**Md. Cabdulqaadir Maxamed Axmed (Jahaweyn),** Wasiirka Warfaafinta, Boostada iyo Isgaarsiinta.

11 
**Md. Maxamed Muxyadin Sheekh Mursal,** Wasiirka Shaqada, Dhallinyarada iyo Cayaaraha

12 
**Md. Cabdiraxmaan Sheekh Ibraahim,** Wasiirka Kalluumeysiga, Khayraadka Badda iyo Bee'ada

13 
**Md. Aadam Cabdullaahi Aadam,** Wasiirka Gaadiidka Cirka, Badda iyo Dhulka iyo Dekadaha

14 
**Md. Avv. Cabdiraxmaan Xoosh Jibriil,** Wisiirka Dastuurka iyo Dibuheshiisiinta

15 
**Md. Jaylaani Nuur Ikar,** Wasiirka Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Dibudhiska

16 
**Md. Cabdulqaadir Maxamed Dhicisow,** Wasiirka Biyaha, Batroolka iyo Macdanta

17 
**Md. Prof. Axmed Caydiid Ibraahim,** Wasiirka Waxbarashada, Hidaha iyo Tacliinta Sare

18 
**Md. Cabdullaahi Goodax Barre,** Wasiirka Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga

# Codka Dadweynaha

*Markuu dhacayay kulankii wadatashiga ee heerka sare laguna go'aaminayay sidii loo dhammeyn lahaa xilliga ku meelgaarka, laguna qabtay magaalada Muqdisho inta u dhexeysay 4ta ilaa 6da bisha September 2011, ayaa madaxda Dowladda Federaalka KMG, Baarlamaanka Federaalka KMG, Galmudug iyo Puntland waxay ansaxiyeen qorshe hawleed xambaarsan hawlaha mudnaanta leh ee loo baahanyahay in la fuliyo inta ka horeysa 20ka bisha Agoosto 2012. Haddaba, annagoo go'aankan maanka ku hayna ayaan la xiriirnay qaar ka mid ah dadka Soomaaliyeed, waxaana weydiinay su'aasha ah: maxaad ka filaysaa inay qabtaan madaxda Soomaaliyeed sannadka soo socda?*

**Cabdiraxmaan, 33 jir, oo ah wariye iyo saykolojiste**

Dowladdu waa inay kasbataa kalsoonida dadweynaha, taasoo dadweynaha ka taageereysa inay fahmaan dowladda. Soomaaliya waxay ahayd meel aan shari iyo kala dambeyn ka jirin 20kii sanno ee la soo dhaafay, dadkuna wax fikrad ah kama haystaan dowladnimada. Xukuumaddu waa inay joojisaa dagaalka dhexdeeda ka socda oo noqday arrin caadi ah. Dadka ku nool dhulka ay gacanta ku hayso kooxda Al-Shabaab waa in loo xaqiijiyaa amaankooda haddii ay doortaan inay u soo gudbaan dhulka ay dowladdu ka taliso. Haweenka waa in awood la siiyaa maadaama ay yihiin kuwa hayay dhaqaalaha reerka 20kii sanno ee dagaalku socday.

**Axmed, 32 jir, oo ah wariye idaacad**

Waxaan jecelahay in la dhammeystiro qorshe hawleedka dowladda iyo qoritaanka dastuurka ugu dambeyn dhammaadka sannadkan. Waa in la taageero sammeynta maamul goboleedyada. Hanaan federaal ah lama sameyn karo ilaa laga helo maamul goboleedyo. Waa in la sameeyo xisbiyo siyaasadeed si loo xaqiijiyo in sannad dambe doorasho la qabto Waxaa kaloon jeclahay inaan arko Al-Shabaab oo Soomaaliya laga ciribtiraya.

**Cabdifataax, 24 jir, oo ah webmaster ama maareeya bogga Internet-ka**

Maadaama, Soomaaliya oo dhammaanteeda nabad lagu soo celiyo ay gacan weyn ka geysanayso in hay'adaha caalamiga ah ay ku noqdaan magaalada Muqdisho, waxaan jecelahay in dowladdu dalka dhammaantiisa dib uga furto hay'adihii waxbarashada si ay dadku fursad ugu helaan waxbarasho. Waxaa kaloon jeclahay in la ciribtiro dhammaan kuwa aan taageersanayn nabadda iyo xasilloonida iyo kuwa xiriirka la leh Al-Shabaab iyo Al-Qaacida

**Nimco, 20 jir, oo ah shaqo doon**

Waxaan rajaynayaa in dowladdu horumariso amniga, dhammeystirtana qoritaanka dastuurka. Waxaa kaloon jeclahay inay xukuumaddu dhisto hay'ado dowli ah oo awood leh kuwaasoo gacan ka geysan kara hanaanka maamul wanaag ee hufan.

**Cabdiqadir, oo ah shaqaale hay'ad madaxbannaan, NGO**

Waxaan jeclahay inay xukuumaddu dhammeystiro qabyoqoraalka dastuurka, oo loo baahanyahay inay dadka Soomaaliyeed ay horseed ka yihiin. Bulshada caalamku waxay faragelin ku haysaa gobanimada Soomaaliyaa, taasna waa la joojiyaa.


EXIT?
ABDI-GAB